

# GANACSIGA MAAREYNTA HANTIDA

## - GANACSIGA FURSADAHA

### **Waxaad timid meesha saxda ah haddii aad rabtid inaad:**

- Ku raaxaysato, shaqooyin dabacsan oo kala duwan – ku shaqeesato gacmahaaga iyo maskaxdaada
    - La kulanto dad cusub – Aad Isticmaashid hal-abuurkada
  - Shaqooyin heersare ka shaqeesid – Aad ku guuleysatid shaqadaada
- 



Fastighetsbranschens  
UTBILDNINGSNÄMND

## KU SOO DHAWOOOW WAKAALADDA HANTIDA MAGUURTADA!

Haddaad raadinayo in aad ka shaqeysyo wakalada hantida maguurtada, waxaa jira hawl muhiim ah oo xiiso leh adigaku sugaysa: xaqijinta in wax walba oo ku saabsan hantida ay si fiican u shaqaynayaan, iyo in dadka deggan ay faraxsan yihiin.

Shaqadaadu waa inad abuurto jawi wanaagsan, bixiso hawo cusub oo nadhiif ah, aad hubiso gudaha inay tahay mid raaxo leh oo diiran xilliga jiilaalka, iyo mid fiican oo qabow marka ay kulaato banaanka ka.

Wiishashka waa inay si fiican u shaqeeyaan, iftiinka waa inuu ahaadaa mid haboon, cawska iyo ubaxa waa in ay ahaadan kuwo si fiican loo dhawray, iyo xilliga jiilaalka waa inuu qofna seexanin banaanka guryaha marka ay noqoto mid baraf leh.

Marka laso gaabiyo, Shaqadaadu waa inaa ka dhigto noolal maalmeedka dadka inay ka shaqeeyaan meesha ay ku nool yihiin, shaqo iyo dukaan.

Haddii aad tahay **bulshaloow, anfacaad leh** oo leh **xirfado farsamo**, haddii aad jeceshahay **xalinta dhibaatada** iyo aad rabto **nolol shaqo oo kala duwan**, waannu ku raadinaynaa. Waxaan u baahannahay qof jecel inuu eego arrimaha farsamada oo ku raaxaysta la shaqaynta dadka kale.

**Hantida waxay  
noqon kartaa, tusaale  
ahaan, dhismayaasha  
degaanka, xafiisyada,  
dugsiyada, isbitaallada,  
suuqyada dukaamada  
iyo noocyada kale ee  
dhismayaasha.**

**Waxaanu dooneynaa in aan  
shaqaaleysiinno in ka badan  
15,000 oo shaqaale cusub  
10 sano ee soo socota!**



## MIYAAN KU RAADINAYNAA ADIGA?

Horaan maka shaqaysay **tiknoolajida, shaqo beer, koronto** ama **wasakhda musqulaha**? Ma ka shaqeysay **goob dhismeed**, ama **Nidaamyada hawo-qaadashada**? Ma xiiseynaysaa **badbaadada dabka**? ama **dib-u-warshadayn**, ama ka shaqeynta **Isticmaalka tamarta** oo tayo badan leh?

Haddii aad ledahay aasaaska saxda ah, xirfad ama xiiso waxaan ku siin karnaa fursadaha shaqo ee soo socda:

- **Waardiye** – Wuxaad masuul katahay maamulka hantida ma guurtada I gudaha iyo dibadda abadaba, oo ay ku jiraan dayactir yar. Wuxaad daryeeli jawiga dibadda, sida cawska, ubaxyada beerta, geedaha iyo nidaamka dib u habeynta hantida. Wuxaad isdhix galaysaan dadka deggan guryaha maalin kasta, oo wuxaad ka ciyaari kaalin muhiim ah si aad u hubiso in qof kastaa uu faraxsan yahay.
- **Maamulaha Hantida** – Wuxaad matalaysaa mulkiilaha hantida marka ay noqoto isgaadhsiinta dibadda ah iyo in aad dadka ula kulanto qaab saaxiibtinimo leh. Adigaa masuul ka ah kormeerka ka hor inta la guurin iyo sidoo kale waxad ledahay Mas'uuliyyadda miisaaniyadda qaarkood. Wuxaad samayni dayactirka qaar kamid ah shaqsyan oo wuxaad u shaqaalaysiin qandaraaslayaal shaqooyinka waaweyn.
- **Farsamo Yaqaanka Hanti maguurtada** – Wuxaad masuul ka tahay hawlgalka iyo ilaalinta nidaamka farsrsamada hantida, kuwaas oo noqdeen kuwa kusii kordhaya hantida horumarsan ee casriga ah. Wuxaad hubisaa in nidaamyadu u shaqeenayaan sida uu codsaday mulkiilaha hantida iyo rajooyinka kireystayaasha.

Jagooyinka shaqooyinka waxay rabaan shahaadada dhamaystirka dugsi sare. Haddii aad horay u soo dhameysay tababar xirfaadeed ama khibrad shaqo hore, wuxaad heli kartaa xirfadahaaga in la ansixyo, u bax tababaro dheeraad ah oo si dhakhsa ah halagugu shaqaalaysiyo.

1. La xiriir shaqaalaha kiiskaaga ee xafiiska shaqada (Arbetsförmedlingen) oo waydiiso is-qiimayn gudaha hantida maguurtada. Is-qiimaynta waxaa lagu heli karaa luqadaha iswidhishka, ingiriiska, carabi, afka iraan iyo afka tigreega.
2. Weydii shaqaalaha kiiskaaga in lagu diro **ansixinta FAVAL**, si uu uraadiyo door xirfadeedka **kugu haboon**. Ansixinta wuxuu kadhacaan **xarunta tijaabada** ee dookhaada. Qiimeynntu waxaa lagu heli karaa lix luqadood: iswidhishka, ingiriiska, Carabi, af iiraan, Af soomali iyo Af Tigree.
3. Kadib waxaad samayni **tijaabada aragti ah** si loo go'aamiyo xirfadaha aad leedahay iyo meesha aad uga baahan tahay horumar. Tijaabada waxaa lagu heli karaa luuqadaha sida qiimeyntha.
4. Shaqaalaha kiiska shaqada waxay kugu caawin doonaan inaad hesho babarka aad ubaahantahay si aad ugashayso sida midkood waardiye, Maamulaha Hantida ama farsma yaqaanka hantida maguurtada ah. Tababarka waxaa kujira layliyo ee shirkadaha hanti maguurtada. Tababarka iyo layliyada waxaa lagu qaban doona luqada iswidhishka.
5. Kadib tababarka iyo layliga waxaad yeelan kartaa xirfadahaaga dib u ansixin oo hel **shahaadada karti-xirfadeed**. Kadib waa inaad dhamaystirta tababar xirfadeed oo buuxa waxayna raadin karaan shaqo.
6. Marka hore, waxaad baran doonta **Swiidish xirfadeed**. Waa sidoo kale qaadan kartaa koorsooyin ku qoran af iswidhishka ee doorarka xirfadeedka wakaaladda hanti maguurtada gudaha appka luqada Lingio. koorsooyin la xiriira hantida maguurtada bilaashka ah ee Lingio ayaa lagu heli karaa ingiriis, Carabi, Af iiraan, Af Somali iyo Af Tigree.

### Ku soo dhawoow wakaaladda hantida maguurtada!

*Guddiga Waxbarashada ee wakaaladda hantidda maguurtada (Fastighetsbranschens Utbildningsnämnd) waxay utaagantahay wakaalada hantidda maguurtada dhanka waxbarashada iyo arimaha kartida. Akhri wax dheeraad ah oo ku saabsan wakaaladda hantidda maguurtada iyo waxqabad xirfadeedkeeda ee boggeena internetka: [www.fastun.se](http://www.fastun.se) Akhri wax dheeraad ah oo kusaabsan qalabka ansixinta wakaaladda FAVAL: [www.faval.info](http://www.faval.info)*



Fastighetsbranschens  
UTBILDNINGSNÄMND